



Fahmida talada soo-saaraha badeecada ee macaamiisha taas oo ka kooban Batteriga Button

May 2019

Talada tabaruca ah ee soosaarah Badeecada ka kooban Button Batteries (Talada) waxaa loo sameeyey inay caawintu kuwa qaybiya (kuwaasi waa sameeyaha, soo dejiyaha, tafaariqlaha iyo kuwa online-ku qaybiya), kaas oo masuul uga dhegaya go'aanada wixii ku saabsan amaanka batteriga button marka la gadayo, la hindisayo, la horamarinayo ama la tafaariiqaynayo batteriga ama alaada ku shaqaysa button batteriga.

Tilmaamaha waxaa lagu bartilmaamaystay cabiraad u badan tan ugu wax ku oolsan xagga hoos u dhigida in ilmuu u furnaado batteriga button. Qoraalkaan xaqiiqada ahi wuxuu bixiyaa xog-urursan oo ku saabsan arrimaha ugu waaweyn ee lagu xusay Tilmaamaha.

Arrinta jirta

Batteriyada Button waxaa loo isticmaalaa waxyalla badan oo kala duwan oo macmiilaha kuwaas oo ay ku jiraan remote control-ka TVga, kaamerooyinka, saacadaha, xisaabiyyaasha (calculators) kaararka salaamaha, miisanada, toojajka iyo kuwa kale oo badan. Waxaa kaloo badanaa laga helaa waxyallaha carruurta soo jiita sida tooyiska, novelties-ka, waxyallaha la iska tuuri karo iyo aalladaha leh nalalka LED.

Batteriga button oo la liqo wuxuu degi karaa hunguriga wuxuuna keeni karaa dhaawac weyn iyo dhimasho.



Badeecada macmiilaha ka kooban batteriga button waa in si adag loo xafidaa sidaas darteed batteriyada ma ay heli karaan carruurta yaryari. Badeecada lagu bedeli karo batteriga button waa halis waxayna bixiyaan macluumaad amaanka la xiriira.

Kuwa qaybiya waxaa lagu dhiirigelinaya inay uhogaansamaan tilmaamahaan si ay u caawimaan ka hortaga khatarta ah dadkana uga badbaadiyaan wixii dhib ah.

Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan khataraha liqida batteriga button waxaa kaga helli karaa: www.productsafety.gov.au/products/electronics-technology/button-batteries

Dhamaan noocyada batteriga button

Ujeedada dukumintigaan, dhamaan unugyada leh muuqalka siman ama bagafsan ama batteriga waxaa loogu yeeraa button batteries iyadoo aan ku xirnayn intay le'egyihiin ama waxa unugyadiisu ka kooban (chemistry). Magacyada kaleeto oo isku ujeedada loo isticmaalo waa 'coin' 'disc' iyo button cells ama batteriyo.

In kasta oo Batteriyada button lithium-ka ee coin-ka le'eg la ogyahay inay sababaan dhaawacyo helis ah iyo in dhimasho ku timaada carruurta, dhamaan batteriyada buttonaad ayay khatar ugu yihiin carruurta gacanta ku dhigta.

Masuuliyaadka kuwa qaybiya

Sida waafaqsan Qaanuunka Macmiilaha ee Australia, qaybiyyaasha waxaa waajib ku ah in aanay samayn been abuur wixii la xiriira tayada, qiiimaha, da'da ama faaiidada badeecada ama adeegyada, ama ballanaqaad kasta ee la xiriira.

Sharciga Macmiilaha ee Australia wuxuu siiyaa macmiilaha ballanaqaad marka ganacsaduhu u keeno badeeco macmiilaha. Tani waa ballanaqaad sharci ah, waxaana ku jira in badeecadaha la keenay tayo iyo amaan ahaan la aqbali karo. Haddii macmiile uu gato badeeco aan tayo ahaan la aqbali karin ama

aan amaan ahayn waxay awoodaan inay sheegtaan xuquuqda ay ku leeyihiin cidda u keentay badeecada waxayna weydiisan karaan ganacsadaha ay iyagu alaabta ka iibsadeen.

Qaybiyyaasha waxaa waajib ku ah inay la socdaan oo baaraan wixii ka soo noqda macmiilaha oo la xiriira amaanka badeecada ay bixiyaan ayna qaadaan fal sixitaan oo ku haboon markay lagama maarmaan tahay. Haddii qaybiyuhu uu ogaado dhaawac, jiro ama dhimasho la xiriirta badeecada ay keeneen, waxaa laga yaabaa inay lagama maarmaan tahay inay u sheegaan dhibta Australian Competition and Consumer Commission (ACCC) laba maalmood gudahood marka la warbixinta.

Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan warbixinta waajibka ah oo dhaawaca iyo dhimashada macmiilaha ayaa laga heli karaa websaytka Amaanka Badeecada Australia ee ACCC: www.productsafety.gov.au/product-safety-laws/legislation/mandatory-reporting

Baahiyaha muhiimka ah ee raacista tilmaamaha wax-soo-saaraha (industry)

Tilmaamahaan waxsoosaaraha, Badeecadaha Macmiilaha (oo ay ku jiraan aalladaha la socda sida Remote Control iyo batteri kasta oo lagu bedelo karo oo lagu soo daray) una baahan hal iyo ka badan batteriga button oo macmiiluhu bedeli karo kaas oo u badan inay heli karaan dhalinyarada yaryari isticmaalid caadi ah ama si xun u isticmaalid la saadaalin karo WAXAANA WAAJIBA:

Samee meel batteriga lagu xereeyo (ama meel kale oo la geliyo) kaas oo ka hor-istaaga dadka dhalinta yari inay hellaan batteriga sida waafaqsan dhamaan kuwa soo socda:

- Helida batterigu waxay u baahan tahay isticmaalida qalab ama aallad laba ah ama ka badan oo kala madaxbanaan IYO talaabooyin isku xiga; iyo



- b. aallado xaqijinaya helida batteri ayaa waajiba in si sahala loogu xiro iyadoo aan amniga wax laga reebayn; iyo
- c. helitaanka batterigu xaqijinayo aaladuhu inay yihiin kuwa waaraaya ilaa xadka aanay jabayn ama noqonayn midaan wax ku ool ahayn ka dib wax badan la isticmaalay; iyo
- d. in loo hindisay loona sameeyey ilaa xadka batteriga aanay heli karin ama halabsan karin dadka dhalinta yari marka alaabada iyo baakadaynta batteri kasta oo bedelaya la bixiyey waxaase shardi ah inuu yahay isticmaal caadi ah ama macquul ahaan mid loo arki karo khalad u isticmaalid

IYO:

- e. Inaad hayso macluumaad laga helli karo halka badeecada lagu soo bandhigay iib ahaan (oo online-ku ku jiro) taas oo muujinaysa in badeecadu (ama wax kasta oo lagu soo daraya) u baahan tahay in bateriyada button ku shaqeeyaan taasina khatar u tahay carruurta yaryar. Macluumaadka waxaa lagu muujin karaa baakadaynta ama calaamad ka gaara.

Bateriyada button loogama jeedo inuu bedelo macmiiluhu waxaana waajib in aanay helli karin marka sheyga caadi loogu isticmaalo macquul ahaana ay u muuqan karaan khalad u isticmaalid ayna waajib tahay inaan la heli karin haddii aan la isticmaalin aallad la filan karo inuu adeegsado farsama-yaqaan, tusaale ahaan kaashawiito ama isbaanar laakiin aan lahayn coin.

Shuruudaha muhiimka ah ee lagu sharxay Tilmaamaha waxay ku salaysan yihiin sida ugu fiican oo hadda loo fahmi karo.

Sida loo sii yarayn karo khataraha

Si loo sii yareeyo in carruurta dhalinta yar uu wax yeello batteriga button kuwa waxaa waajiba in kuwa qaybiyya qadariyaan:

- haddii ay tahay in la qaybiyo qalab ka kooban button ama lithium le'eg qadaadiicda batteriga gebi ahaanba
- haddii badeecada ay xoojin karaan noocyoo kale oo bateri kuwaas oo aan keenay isla khatarta sida bateriga button

- samaynta hubin badeecada kale iyo ka saarida kuwa aan u hogaansanayn Tilmaamaha
- qaybinta keliya bateriga button iyo badeecooyin kale oo ka kooban bateriga button kuwaas u hogaansama Tilmaamahan
- dib u eegida dhererka halka bateriga button iyo badeecooyinka ka kooban bateriga button ee lagu muujiyey bakhaarka, kuwaas oo carruurtu aanay gaari karin
- xulashada doorashada noocyada bateriga lagu keenay baakadайн ku haboon oo carruurtu aanay furi karin laguna muujiyey digniinaha u sheegaya macaamiisha khatarta ay carruurta u leeyihii
- in baakadayntaas ama awaamiirta bateriga button in lagu muujiyo digniin u sheegaysa macmiilaha khataraha carruurta yaryar xagga liqida/gelinta bateriga button
- la socodsiinta macmiilayaasha khatarta button bateriga iyaga oo ku siinaya digniin bakhaarka dhexdiisa.

Macluumaad intaas ka badan

Waxaad ka helli kartaa halkaan Tilmaamaha qoraalkaan oo Ingiriis ah: www.productsafety.gov.au/publication/industry-code-for-consumer-goods-that-contain-button-batteries

Tilmaamaha waxaa ku jira cadayma ku haboon iyo astaamo loo isticmaalo digniinaha iyo baakadaynta iyo weliba liiska mustawayaaasha amaanka ee la xiriira.

Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan masuuliyada jahooyinka badeecada iyo tijaabinta badeecada macmiilaha waxaa laga helli karaa halkan:

- Xogaha masuulka ah ee badeecadaha www.productsafety.gov.au/product-safety-laws/compliance-surveillance/responsible-sourcing-of-products
- Tijaabinta badeecada ee dadeecada macmiilaha www.productsafety.gov.au/product-safety-laws/compliance-surveillance/product-testing